

Caddayaayna iyo Qirashada Codsadaha

Magaca (magacyada) Codsadaha: _____

Ciwaanka Deganaanshaha Aasaasiga ah: _____

HomeHelpMN waa barnaamij lagu maalgeliyay lacagta federaalka oo ay maamusho Hay'adda Maaliyadda Guriyeynta ee Minnesota. Sida uu u baahanyahay Sanduuqa Caawinta Mulkiilaha Gurigu (HAF) (Homeowner Assistance Fund (HAF)) kaas oo lagu aasaasay Qaybta 3206 ee Sharciga Qorshaha Samatabbixinta Maraykanka ee 2021 ("ARP"), si mulkiilaha gurigu uu xaq ugu yeesho inuu helo gargaar waa in uu haysto:

- in uu la kulmay dhibaato dhaqaale oo u qalanta wixii ka dambeeyay Janaayo 21, 2020, iyo,
- in uu leeyahay dakhli aan ka badnayn 100% dakhliga dhexdhexaadka ah ee aagga (AMI) marka loo eego degmada, ama 100% dakhliga dhex-dhaxaadka ah ee Maraykanka.

Dhibaato maaliyadeed macnaheedu waa hoos u dhicista dakhliga ama korodhka kharashyada nolosha ee la xiriira aafaada cudurka coronavirus taas oo abuurtay ama kordhisey khatarta la dibdhicista bixinta deynta guriga, bixinwaayida amaahda guriga, howsha in bangigu la wareego guriga, waayitaanka adeegyada ama adeegyada tamarta guriga ama barokaca mulkiilaha guriga (tusaale ahaan, luminta shaqada, hoos u dhaca dakhliga, ama kharashka oo kordhay sababtoo ah daryeelka caafimaadka ama baahida loo qabo daryeelka xubin qoyska ka mid ah). Intaa waxa dheer, lacagta HAF waxa uu heli karaa mulkiilaha guriga keliya marka la eego kharashyada u qalma ee la xiriira guriga uu deganyahay mulkiilaha gurigu.

Dhammaan mulkiilayaasha gurigu waa inay talo ka raadsadaan xirfadlaha canshuurta oo madaxbannaan wixii ku saabsan saamaynta cashuurta ee ka iman kara aqbalida lacagaha HomeHelpMN. Hagida ku saabsan saamaynta cashuurta waxa saamayn kara isbedelada sharciga cashuuraha waxayna ku xiran tahay xaqiiqooyinka cayiman iyo duruufaha mulkiilaha guriga. Waaxda Dakhliga ee Minnesota waxay filaysaa inay raacdo Habka Dakhliga IRS 2021-47 (IRS Revenue Procedure 2021-47). Taas macnaheedu waa Waaxda Dakhliga ee Minnesota waxay guud ahaan filaysaa:

- Milkiilayaasha gurigu uma baahna inay ka bixiyaan canshuurta dakhliga ee Minnesota ee 2022 lacagaha HomeHelpMN;
- Lacag bixinta HomeHelpMN waxaa laga yaabaa inay yaraato ama meesha ka saarto qaddarka lacag celinta ee lagu helo waxbarashada Minnesota ee uu shaqsigu u qalmo inuu dalbado sanadka canshuureedka 2022; iyo
- Lacag bixinta HomeHelpMN waxaa laga yaabaa inay yaraato ama meesha ka saarto qaddarka lacag celinta ee lagu helo canshuur celinta hantida Minnesota ee uu shaqsigu u qalmo inuu dalbado canshuurta guryaha ee la bixinayo 2023.

Anigu, marka aan saxeexo xagga hoose, waxaan caddaynayaa waxyaabaha soo socda:

1. Waxaan la kulmay dhibaato dhaqaale wixii ka dambeeyey Janaayo 21, 2020, taasoo si buuxda loogu faahfaahiyey Arjigayga HomeHelpMN.
2. Waxaan ku noolahay guriga leh ciwaanka kor ku qoran, waana degenaanshahayga aasaasiga ah sanadka intiisa badan.
3. Waxaan idin siiyay macluumaad sax ah oo ku saabsan dakhliga dhammaan xubnaha qoyskayga sida ku qoran arjigayga, iyo in tirooyinku ay run iyo sax yihiin.
4. Dhammaan macluumaadka aan ku bixiyey nidaamka codsigu waa run oo waa sax.
5. Waxaan fahamsanahay in wixii si been abuur ah ama si taxadar la'aan ah ee cadeyntan ama bayaan kasta oo aanu u dhiibno oo la xiriira codsiga kaalmada ee barnaamijka HomeHelpMN uu noqon karo xadgudub federaali ah oo lagu ciqaabi karo ganaax iyo/ama u diidmadeena arjiga caawimada, ama, haddii caawimada lanoo sii daayay kahor inta aan la ogaanin bayaanka beenta ah, dib u soo celin degdega ah ee kaalmada, taas oo noqon karta marka lagu daro wixii ciqaab ah ee uu sharcigu soo rogo.

Waxaan cadeynayaa in jawaabaha ku jira baaritaankayga horudhaca ah, arjiga gargaarka iyo caddayntani ay yihiin run iyo sax. Waxaan u fasaxayaa Minnesota Housing inay soo helaan diiwaannada macluumaadka ee khuseeya xaaladdayda dhaqaale ama shaqo iyo xaaladaha keenay dhibaatadayda, meel kasta in ay kasoo helaan, si ay u xaqiijiyaan macluumaadka aan bixiyay.

SAXIIXYADA

Dhammaan codsadayashu waa inay saxiixaan caddayntan.

_____	_____	_____
Magaca Codsadaha	Saxeexa Codsadaha	Taariikhda
_____	_____	_____
Magaca Codsadaha	Saxeexa Codsadaha	Taariikhda